

Wanaajinta Natiijooyinka Caafimaadka iyadoo la Nidaaminayo Kala-guurka Nolosha Iyo Caymiska

Waqtigaan xaadirka ah, nidaamka daryeelka caafimaadka si fiican looguma naqshadeyn inuu taageero dadka uu caymiskooda caafimaad leeyahay nusqaamo, gaar ahaan kuwa ku tiirsan caymiska Medicaid ee Oregon, Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP). Dhibaatooyinka ku yimaada caymiska OHP ayaa inta badan keena in xubnuhu ay awoodi waayaan inay helaan daawayn caafimaad, awoodi waayaan inay arkaan daryeel bixiyaashooda la qoondeeyay, iyo inay lumiyaan adeegyada kale ee xasilinta ee muhiimka ah ee loo baahan yahay si wax looga qabto SDOH loona joogteeyo caafimaad wanaagsan. Intaas waxaa dheer, dadka ku jira xaaladaha caafimaad ee adag, leh baahiyo bulsheed oo qoto dheer, iyo/ama ay yar tahay awoodooda ah inay isku dubaritaan daryeelkooda waxay u baahan yihiin isku-duwid daryeel oo xoogan oo ay ka helaan bixiyayaashooda.

Intaas waxaa dheer, waxaa si weyn loo aqbalay in waxyaabaha ku saabsan bulshada ee gacanta ka geysto go'aaminta caafimaadka (SDOH), sida deegaanka la dhisay iyo guriyeynta, helida cunto caafimaad leh iyo goobo cagaaran, fursadaha shaqo iyo dakhliga, ay ka dhigan yihiin 80-90% natiijooyinka caafimaadka qofka.¹ ² SDOH-yadan, oo ay ku jiraan cunsuriyadda qaab-dhismeedsan, ayaa ah sababaha aasaasiga ah ee xaqsoor la'aanta caafimaadka iyo nolosha gaaban.³

Gobolka Oregon wuxuu rabaa inuu arrimahan wax kaga qabato iyadoo:

- La xaqiijinayo in caymiska Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP) la heli kara xilliyada isbeddelada nololeed iyo isbeddellada caymiska, iyo
- Wax laga qabanayo dhammaan waxyaabaha saameeya caafimaadka, kuwa caafimaadka la xiriira iyo kuwa aan caafimaadka la xiriirin labadaba inta lagu gudajiro xilliyada isbeddelada nolosha.

Xaqiijinta in caymiska OHP la heli kara xilliyada isbeddelada nololeed

Waxqabadyo qeexan oo aan caafimaadka la xiriirin, caddayn ku-salaysan oo wax ka qabanayo baahiyada aan la daboolin ee guriyeynta, gaadiidka la xiriira caafimaadka, sugnaanta cuntada, taageerada shaqada iyo u nuglaanshaha dhacdooyinka ba'an ee cimilada ayay heli doonaan xubnaha OHP ee loo aqoonsaday inay wajahayaan xilliyada ay jiraan isbeddelo nololeed.. OHA waxa ay isku toosin doontaa maalgelinta iyo kaabayaasha si ay u abaabusho, u dhiirigeliso, una taageerto bixinta daryeel ku aadan wanaajinta caafimaadka mustaqbalka ee xubnaha OHP ee wajahayo xilliyada ay jiraan isbeddelo nololeed.

Waxkaqabashada dhammaan waxyaabaha saameeya caafimaadka

Gobolka Oregon wuxuu ka shaqaynayaa inuu daboolo baahiyada jireed, kuwa habdhaqameed, iyo kuwa korriinka ee dhammaan xubnaha OHP iyadoo la adeegsanayo hab isku dhafan oo bukaanka ku salaysan oo loogu talagalay qof oo dhan. Si loo gaaro yoolkan, gobolka Oregon wuxuu codsan doonaa oggolaansho wax

¹ Magnan, S. (2017). Waxyaabaha Gacanta Ka Geysto Go'aaminta Caafimaadka 101 ee Daryeelka Caafimaadka: Five Plus Five. Akademiyadda Qaranka ee Caafimaadka (National Academy of Medicine). Laga heli karo: <https://nam.edu/social-determinants-of-health-101-for-health-care-five-plus-five/>

² Hood, C. M., K. P. Gennuso, G. R. Swain, and B. B. Catlin. 2016. Qiimeynta caafimaadka degmada: Xiriirka ka dhexeeya waxyaabaha gacanta ka geysto go'aaminta caafimaadka iyo natiijooyinka caafimaadka. *Joornaalka Maraykanka ee Daawada Kahortagga* ah 50(2):129-135.

looga beddelayo xeerarka Medicaid si wanaagsan loogu gaaro dadka ku jira xaaladaha nolosha qaar, iyo in si loo bixiyo taageerooyinka iyo adeegyada caafimaadka la xiriira inta lagu gudajiro xilliyada u kala wareega goobaha ama xilliyada dab-duureedka, kulaylka daran, ama dhacdooyinka kale ee ba'an ee cimilada. Haddii la ansixiyo, gobolka Oregon wuxuu wax ka qaban doonaa nusqaamaha caymiska Medicaid iyadoo caymiska loo fidinayo – muddo xaddidan – dadka u qalma ee wajahayo isbeddelada nololeed lana siinayo adeegyada SDOH ee hoos lagu qeexay.

Si loo xaqiijiyo in caymiska OHP la heli kara xilliyada isbeddelada nololeed iyo si wax looga qabto dhammaan waxyaabaha saameeya caafimaadka, kuwa caafimaadka la xiriira iyo kuwa aan caafimaadka la xiriirinba, gobolka Oregon wuxuu codsan doonaa in:

1. Laga tanaasulo xeerka federaal ee horjoogsanayo in caymiska Medicaid uu helo qofka xabsiga ku jira, oo ay ku jiraan dadka xabsiga galay iyo kuwa ku jira Isbitaalka Gobolka Oregon iyo xarumaha degaanka ee caafimaadka maskaxda, gaar ahaan si:
 - a. Loo joogteeyo macaashyada iyo/ama loogu fidiyo macaashyada Medicaid dhammaan dhalinyarada u-qalma Medicaid ee gelaya nidaamka asluubta muddada ay ku jiraan xabsiga dhallinta oo dhan iyadoon loo eegayn goobta.
 - b. Loo bixiyo macaashka xaddidan ee OHP (tus., daawooyinka dhakhtaru qoro, hagid ka-gudub, helida adeegyada isbeddelka) iyo diiwaangelinta CCO loogu fidiyo xubnaha OHP ee laga soo saari doono Isbitaalka Gobolka Oregon, xarumaha degaanka ah ee caafimaadka maskaxda ama xabsi ku galay gudaha gobolka, muddo ah 90 maalmood kahor soo sii-daynta.
 - c. Loo bixiyo macaashka xaddidan ee OHP iyo diiwaangelinta CCO loogu fidiyo xubnaha OHP ee xabsiga ama asluubta ku jira, oo ay ku jiraan kuwa sugaya xukunka.
2. Loo joogteeyo heerarka u-qalmida ee ilmaha iyo xirmada faa'iidooyinka loogu talagalay Dhallinta Qabta Baahiyaha Daryeelka Caafimaadka ee Khaaska ah (YSHCN) ilaa ay ka gaarayaan da'da 26.
3. Loo sameeyo loona maalgeliyo, haddii la haysto awood kharash-gareyn, adeegyada xilliyada isbeddelada ee SDOH oo qeexan si loo taageero xubnaha u baahan xilliyada isbeddelada ay ka jiraan caymiska iyo xilliyada isbeddelada nololeed.
4. Loo ballaariyo loona maalgeliyo, haddii la haysto awood kharash-gareyn, kaabayaasha loo baahan yahay si loo taageero helida adeegyada iyadoo la isticmaalayo bixiyeyaasha ka baxsan moodheelka caafimaadka.
5. Loo helo awood kharash-gareyn si loo taageero awoodda hirgelineed ee heerka bulsho, oo ay ku jiraan bixinta lacagta kaabayaasha iyo kobcinta awoodda ee loogu talagalay bixiyeyaasha iyo ururada bulsheed (CBO).

Dhibaataada iyo Araarta

Qiimeynta Caafimaadka Gobolka Oregon ee 2018 waxay muujisay xaqsoor la'aan salka ku hayso waxyaabaha soo socda ee ku saabsan bulshada ee gacan ka geysto go'aaminta caafimaadka bulshada.³ Mid kasta oo ka mid ah xaqsoor la'aantan waxay u nugleynayaan xubnaha saamaynada taban ee ka dhasho xilliyadan isbeddelada iyo dhacdooyinka cimilada ee aadka u ba'an.

- Marka laga reebo dadka Aasiyaanka ah, dadka midabka leh waxay wajahaan hoy la'aan heer sare ah marka loo eego dadweynaha guud.

³ <https://www.oregon.gov/oha/PH/ABOUT/Documents/sha/state-health-assessment-full-report.pdf>

- Ku dhowaad dhammaan kooxaha jinsiyadaha iyo qowmiyadaha ku nool Oregon – gaar ahaan Afrikaanka Maraykanka ah – waxay leeyihiin heerar saboolnimo oo sareeya marka loo eego heerka guud ahaan dalka Mareykanka.
- Saddex meelood hal meel ee dhammaan qoysaska Afrikaanka Maraykanka ah waxay in ka badan 50% dakhligooda ku bixiyaan kharashyada guryaha, marka la barbardhigo qiyaasta ah 17% ee dhammaan qoysaska ku nool gobolka.
- Afrikaanka Maraykanka ah ee ku nool Oregon waxay 4.6 jeer uga dhow yihiin in la xiro/xabiso dhiggooda cadaanka ah, waxayna dadka ah Dhaladka Maraykanka wajahaan heerar xaabiis oo ah 1.8 jeer ka weyn kuwa dadka cadaanka ah halka Latino/a/x ay wajahaan heerar xaabis oo 1.4 jeer ka weyn kuwa dadka cadaanka ah.

Hal arrin oo gacan ka geysata saameynadan caafimaad ee xunxun ee aan loo sineyn ayaa ah nusqaamo ka jira caymiska OHP, oo ay sababaan xilliyada isbeddelada nololeed. Carqaladeynta caymiska iyo macaashyada ayaa waxay sababi kartaa xasillooni darro ku timaada nolosha qofka, gaar ahaan xilliyada ay jirta nuglaan sare. Nusqaamaha ka jira caymiska waxay inta badan sababaan in xubnaha heli waayaan bixiyayaasha ama adeegyada, taasoo keenayso natiijooyin caafimaad oo ba'an iyo daryeelka oo sii qaaliyooba.^{4,5}

Xilliyada isbeddelada ee inta badan abuura nusqaamaha caymiska ayaa waxaa keena dhaqdhaqaaqyada marxaladaha nololeed, isbeddellada hay'adaynta, masiibooyinka dabiiciga ah, ama isku darka kuwani. Intaas waxaa dheer, xilliyada isbeddelada ee sababay nusqaamaha ayaa si ka badan dadka kale ugu dhaca xubnaha OHP ee ka tirsan bulshooyinka midabka leh, taasoo xaddidaysa awooddooda ah in la daboolo baahiyahooda caafimaad iyo kuwa bulsheed.

Xilliyada leh isbeddelada waaweyn ayaa caqabad ku ah in xubnaha OHP ay gudbaan xilliyadan maadaama nidaamka daryeelka caafimaadka uu yahay mid qallafsan. Xubnuhu ayaa laga yaabaa inay lumiyaan u-qalmida Medicaid ama laga saaro ururkooda daryeelka isku-duwan (CCO) taasoo keenayso carqaladayn ku timaada daawaynta iyo isku-duwida bixiyayaasha dhexdooda ah. Adeegyada wanaajin kara awoodda xubnaha si ay u ilaashadaan caafimaadkooda iyo tayada noloshooda, sida helida la saadaalin karo ee taageerooyinka guriyeynta marka qofka laga sii daayo xabsiga, caadiyan ma ahan macaashyo ku caynsan Medicaid. Carqaladeynta caymiska iyo macaashyada ee ay sababaan dhacdooyinkani waxay sababi kartaa xasillooni darro ku timaado nolosha qofka marka ay jirta nuglaansho heer sare ah waxayna inta badan

⁴ <https://www.ncbi.nlm.nih.gov/pmc/articles/PMC5548183/>

⁵ <https://pubmed.ncbi.nlm.nih.gov/28728555/>

³ Xaqsoor la'aanta caafimaadka wuxuu dhacaa marka siyaasado iyo dhaqamo bulsheed oo aan cadaalad ku salayneyn ay u diidaan kooxo shakhsiyad ah fursad ay ku helaan caafimaadka ugu fiican, iyadoo loo adeegsanayo la'aanta khayraadyo lagu hormariyo caafimaadka ama iyadoo loo marayo u-baylihinta kordhaysa ee waxyaabaha keeno halista cudurrada. https://www.bphc.org/healthdata/health-of-boston-report/Documents/3A_Health%20Equity_16-17_HOB_final-3.pdf#search=difference%20between%20inequities%20and%20disparities

keentaa nusqaamo ku yimaada helida adeeg bixiyayaasha ama adeegyada, taasoo keenayso natiijooyin caafimaad oo ba'an iyo daryeelka oo sii qaaliyooba.^{6,7}

Taageerada iyo adeegyada muddada-gaaban ee diiradda la saarayo ee si gaar ah ugu xiran baarista dhacdooyinka carqaladaynta leh, baahiyada bulshada iyo natiijooyinka la wanaajiyey ayaa gacan ka geysan doona in lagu guuleysto xilliyada isbeddellada waxayna yareyn doonaan saameynta dhacdooyinka uga sii daraya xaqsoor la'aanta caafimaadka, iyadoo dhalinayo natiijooyin caafimaad oo wanaagsan isla markaana keenayo in dowladda federaalka iyo gobolka ay helaan kayd kharash.

Wax ka qabashada SDOH iyadoo loo marayo sharciga 2017-2022 1115(a) ee dib-u-cusboonaysiinta ka-tanaasulka tijaabada

Marka la eego sharciga Oregon ee 2017-2022 1115(a) ee dib-u-cusboonaysiinta ka-tanaasulka tijaabada, OHA waxay soo bandhigtay adeegyo la xiriira caafimaadka (HRS) si ay u kordhiso awoodda CCO-yada ay ku isticmaalaan adeegyada aan caafimaadka la xiriirin si ay wax uga qabtaan arrimaha bulsheed ee xubnaha ee caafimaadka la xiriira iyo xaqsoor la'aanta gacanta ka geysanayso caafimaadka liita. Si kastaba ha ahaatee, ilaa iyo maanta, kharashka ku baxa HRS ayaa ah mid hooseeya (0.7% celcelis ahaan) oo aan si buuxda wax uga qabanin baahiyada dadka wajahayo isbeddelada caymis. Kharash-gareyntan hoose ayaa ah mid laga walaaco marka la eego suurto galnimada in la wanaajin kara natiijooyinka caafimaadka xubnaha iyo bulshada.

Muddada tijaabada xigta, OHA waxa ay soojeedin doontaa in ay dejiso qiimooyin ah miisaaniyada guud ee qiimaha ku salaysan si ay CCO-yada u siiso saadaalin iyo dabacsanaan weyn, taasoo u oggolaanayso inay kordhiyaan maalgelinta HRS iyadoo aan laga welwelaynin in khidmadaha caymiska hoos u dhacaan marka ay natiijooyinka caafimaadku soo fiicnaadaan oo kharashka caafimaadna uu hoos u dhaco.

Si loo bilaabo maalgelinta la korodhinayo ee HRS, OHA waxay raadsan doontaa awood kharash-gareyn si ay u abuurto lacag go'an oo lagu maalgelinayo HRS khaas ah taasoo loogu talagalay xubnaha wajahayo xilliyada isbeddelada nololeed ee halis sare u gelinaya inay lumiyaan caymiska. Sidani markii la sameeyo, CCO-yadu waxay qiimeyn karaan HRS-ta si wax ku ool ah u wanaajinayso caafimaadka isla markaana yareyneeyso kharashyada caafimaadka.

Liiska adeegyada xilliyada isbeddelada ee la ansixiyay ee SDOH waxaa loo naqshadeyn doonaa qaab lagu yareeynayo halista nusqaamaha caymiska ee carqaladaynta leh isla markaana wax looga qabanayo SDOH. Tan waxaa ku jiri kara adeegyada guriyeynta, adeegyada gaadiidka caafimaadka la xiriira, kaalmada nafaqada, kaalmada shaqada iyo/ama kaalmada la siiyo xubnaha wajahayo dhacdooyinka cimilad oo aad u daran. Marka taageerooyinkan laga dhigo kuwa la heli karo, xubnaha ku jira xilliyada isbeddelada ee u qalmo waxay marin u heli doonaan aaladaha lagama maarmaanka u ah in si guul leh loogu gudbo xilliyada isbeddelada iyadoo ilaalinayo xasilloonida loogu baahan yahay caafimaadka wanaagsan iyo tayada nololaha. Marka adeegyadan si ka baxsan miisaaniyadda guud lagu maalgeliyo marka hore iyadoo la adeegsanayo CCO-yada, CCO-yadu waxay baran doonaan adeegyada ugu waxtarka badan kadibna waxay adeegyadan ku maalgelin doonaan miisaaniyaddooda guud maadaama ay OHA (iyo CMS) joojin doonaan maalgelintooda dheeraadka ah.

⁶ <https://www.ncbi.nlm.nih.gov/pmc/articles/PMC5548183/>

⁷ <https://pubmed.ncbi.nlm.nih.gov/28728555/>

Istaraatijiyada hoos lagu sharraxay ayaa bixin doona caymis loogu talagalay goobaha ay nusqaamaha ka jiraan haatan (tus., gelida/ka bixista goobaha hay'adaha, u-qalmida la xiriirta da'da). Intaas waxaa dheer, istaraatijiyadaha la soojeediyay waxay ujeedoodu tahay in ay wax ka qabtaan dhammaan waxyaabaha saameeya caafimaadka, kuwa la xiriira caafimaadka iyo kuwa aan caafimaadka la xiriirin labaduba, iyadoo adeegyada SDOH la siinayo xubnaha – iyo, mararka qaarkood, iyadoo loo marayo adeeg bixiyeyaasha ku salaysan bulshada ee ka baxsan moodheelka caafimaadka - kahor isbeddellada dheefaha Medicaid iyo/ama isbeddellada u-qalmida.

Istaraatijiyadaha la soojeediyay

Istaraatijiyada 1-aad. Ka dhaafidda xeerka fadaraalka ee ka horjoogsanaya qofka xabsi ku jira inuu helo macaashyada Medicaid.

Inkastoo gobolka Oregon uu ku guulaystay inuu boqolaal kun oo qaangaar ah ka diiwaangeliyo OHP intii lagu gudajiray ballaarinta Medicaid ee gobolka, shaqsiyaadka xabsiga galay, iyo kuwa ku jira xarumaha Machadyada Cudurada Maskaxda (IMD) ayaa waxay wajahayaan caqabado adag oo ka haysto caymiska. Haatan, haddii shakhsiyadkan ka diiwaangashan yihiin OHP marka la gelinayo machadyada, gobolka Oregon wuxuu hakinayaa caymiskooda. Diiwaangelinta ayaa dib loo soo celinayaa marka la soo sii daayo laakiin badanaa waxay qaadataa 10-14 maalmood, taasoo sababayso in shakhsiyadka ahaadaan adeegyo la'aan. Xubnaha u baahan daawaynta guriga lagu bixiyo ama adeegyada ciladaha isticmaalka mukhaadaraadka (SUD) lama heli karo ilaa ay dib u bilaabato diiwaangelinta, taasoo keenayso in dadkani aysan haysan adeegyadaas muhiimka ah muddo toddobaadyo ah.

Ku guuldareysiga in adeegyada caymiska caafimaadka iyo daryeelka caafimaadka la siiyo shaqsiyaadka ka soo baxaya xabsiga ayaa saameyn weyn ku leh dib ugu noqoshada dambiga, natiijooyinka caafimaadka, iyo kharshka.^{8,9} Shakhsiyadka xabsiga galay waxay wajaahan heerar sare oo ah in laga helo cuduro jireed iyo kuwa habdhaqameed.¹⁰ Mar labaad, dadka midabka leh ayaa si xad dhaaf ah ugu badan dadka ku xiran gudaha Oregon,¹¹ taasoo macnaheedu yahay in dadka midabka leh ay si heer sare ah waxyeello uga soo gaaraan nusqaamaha ka jira caymiska OHP ee inta badan la wajaha xilliyada ka soo bixida xarumaha.

Xubnaha dib ugu soo laabanaya bulshada ee ka imanaya xarumaha waxay la kulmi doonaan caqabado yar markay timaado helida daryeelka iyo adeegyada haddii la bixiyo:

- caymiska OHP oo xaddidan iyo
- Isdiiwaangelinta CCO oo daboolayso isuduwidda daryeelka iyo adeegyada hagidda oo ay weheliyaan adeegyada SDOH ee xilliyada isbeddelka ee la soojeediyay.

⁸https://journals.lww.com/professionalcasemanagementjournal/Abstract/2009/03000/Reducing_30_Day_Inpatient_Psychiatric_Recidivism.8.aspx

⁹ https://cdr.lib.unc.edu/concern/honors_theses/i6731775s

¹⁰ Rich, J. D., Wakeman, S. E., & Dickman, S. L. (2011). Daawooyinka iyo Xaabis-gelinta badan ee Maraykanka. New England Journal of Medicine, 364(22), 2081- 2083. doi:10.1056/nejmp1102385

¹¹ <https://www.vera.org/downloads/pdfdownloads/state-incarceration-trends-oregon.pdf>

Gobolka Oregon wuxuu codsanayaa in laga tanaasulo sharciga federaalka ee ka hortagaya in qofka xabsiga ku jira uu helo macaashyada Medicaid wuxuuna gobolka codsanayaa kaalmo federaal si loo taageero caymiska shakhsiyaadkan.

Haddii la helo awooda ka-tanaasulidan, gobolka Oregon ayaa si gaar ah:

- a. **U joogteyn doona macaashyada iyo/ama macaashyada Medicaid wuxuuna u fidin doona dhammaan dhalinyarada u qalmo Medicaid marka ay galayaan nidaamka sixida dhallinta/xabsiga iyo dhammaan muddada ay ku jiraan xabsiga dhallinta.**

Dhalinyarada galay nidaamka xabsiga dhalinta ayaa si aasaasi ah halis ugu jira. Dhallinyarada taariikh u leh ku lug lahaanshaha daryeelka carruurta ama nidaamyada caafimaadka habdhaqanka waxaa heer xaad-dhaaf ah loogu gudbiyaa nidaamka xabsiga dhalinta. Mar labaad, dhalinyarada midabka leh ayaa si xad dhaaf ah ugu badan nidaamka asluubta ee dhalinta, waxaana sareeya heerarkooda gelitaanka xarumaha sixida ee sugan.¹² Dhallinyaradan midabka leh ayaa waxay u badan yihiin inay qabaan baahiyo caafimaad iyo kuwa habdhaqameed oo adag oo qaali ah, sababtuna waa saamaynta ay ku yeelatay cunsuriyadda qaab-dhismeedka ah iyo arrimo kale, waxayna u badan tahay inay helin daryeel caafimaad iyo adeegyo caafimaad oo kahortag ah oo joogto ah noolashooda oo dhan.¹³

Shakhsiyaadkani waxay inta badan ku lug leeyihiin nidaamyo kala duwan (caafimaadka, habdhaqanka caafimaad, waxbarashada, daryeelka carruurta) waxaana laga yaabaa inay u baahdaan khayraadyada daawayn ah takhasus heer sare ah oo ay adag tahay in la helo haddii aysan jirin ilo lacag-bixin iyo maareynta xaalada. Marka adeegyada daryeelka caafimaadka iyo xoogga moodheelka daryeelka isku-duwan la bixiyo xilliyada isbeddelada nololeed ee halista ah (gelida xabsiga) iyo marxaladda nololaha ee muhiimka ah (dhallinyarada, iyo inta badan dhallinyarada midabka leh ee sida xad-dhaafka ugu badan maraxladahan), istaraatiijiyadani waxay wanaajin kartaa caafimaadka nololaha dhalinyaradan halista sare ku jira waxayna keydin kartaa kharashyada muddo dheer ku bixi lahaa nidaamyada kala duwan.

- b. **U bixin doonaa macaashyo ka tirsan OHP oo xaddidan iyo diiwaangelinta CCO iyo adeegyada xilliyada isbeddelada ee xilliga sii-daynta ee loogu talagalay xubnaha OHP ee ku jira (i) Isbitaalka Gobolka Oregon, (ii) xarumaha degaanka ah ee caafimaadka maskaxda, iyo (iii) xabsiga (90 maalmood kahor sii-daynta).**

Xubnaha OHP ee ka baxayo xabsiga ayaa si gaar ah halis ugu jira natiijooyin caafimaad oo liita. Shakhsiyaadka xabsiga galay waxay la kulmaan heerar aad u sarreeya oo ah cudurada jireed iyo kuwa dabeecadeed waxayna halis sare ugu jiraan dhaawac iyo dhimasho ka dhasho rabshad, garoojooyin (daawo/maandooriye) xad-dhaaf ah, iyo isdil marka la barbardhigo dadka aan weligood xabsi la gelinin. Tusaale ahaan, heerka dhimashada ka dhalata garoojooyinka (daawo/maandooriye) xad-dhaafka ah ee shakhsiyaadka xabsiga galay ayaa 100 labalaab ka

¹² <https://pubmed.ncbi.nlm.nih.gov/23334336/>

¹³ Sedlak AJ, McPherson KS. Baahiyada iyo adeegyada dhalinyarada. OJJDP Juvenile Justice Bulletin. 2010;Aabriil:10–11. Laga heli kara: www.ncjrs.gov/pdffiles1/ojjdp/227728.pdf

badan heerarka dhimashada dadweynaha guud..¹⁴ Dadka xabsiga ku jira ee qaba xanuunada habdhaqameed ayaa aad ugu dhow, marka loo eego kuwa aan qabin xanuunada, inay ahaayeen hoylaawe sannadkii ka horeeyay xabsigooda, waxay u badan tahay inay ahaayeen shaqo la'aan kahor intaan la xirin, waxayna u badan tahay inay soo sheegeen xadgudub jireed ama mid jiniyeed/galmo oo loo geystay.¹⁵

Haddii la xaqiijiyo in dadka xabsiga galay ay helayaan macaashyo 90 maalmood kahor soo sii-daynta iyo inay helayaan shabakada adeegyada daryeelka caafimaadka iyo taageerada oo diyaar u ah marka la sii daayo, kuwaasoo ay wehliyaan adeegyada SDOH ee la soojeediyay ee xilliyada isbeddelka, gobolka Oregon wuxuu higsanayaa:

- Inuu wanaajiyo natiijooyinka caafimaadka jireed iyo midka habdhaqameed ee xubnaha la xiray soo sii-daynta kadib
- Inuu yareeyo booqashooyinka waaxda xaaladaha gurmada ah, isbitaal dhigida, iyo adeegyada kale ee laga ahaan karo haddii xubnaha OHP ee xabsiga galay lagu xiriiriyo adeegyada caafimaadka jireed iyo midka dhaqameed ku saleysan bulshada ee haatan ee joogtada ah
- Inuu kor u qaado sii wadida daawaynta
- Inuu yareeyo kharashaadka daryeelka caafimaadka iyadoo la xaqiijinayo sii wadida daryeelka iyo adeegyada marka xubnahani lagu sii daayo bulshada

c. Faa'iidooyin xadidan oo ka tirsan OHP iyo diiwaangelinta CCO u fidin doona xubnaha OHP ee xabsiga ama xarunta asluubta ku jira, oo ay ku jiraan kuwa sugaya xukunka

Codsigan caymisku wuxuu tixgalinayaa muddada gaaban (in ka yar 90 maalmood) iyo muddada aan la hubin ee ku jirida xabsiga degmada iyo xarumaha kale ee sixida ee deegaanka. Si loo joogteeyo sii wadida daryeelka loona xaqiijiyo in baahiyada jireed iyo kuwa habdhaqameed la daboolo marka maxaabiista la soo sii daayo, xubnaha OHP ee ku jira jeelasha degmada iyo xarumaha asluubta ee deegaanka waxay heli doonaan faa'iido xaddidan oo ay OHP ay bixinayso inta lagu jiro xabsiga. Gobolka Oregon waxa uu codsanayaa in dadka aan hadda haysan caymiska OHP oo ansax ah ay taageero ka heli doonaan Barnaamijka Wacyigelinta Iskaashatada Bulshada ee OHA iyo shaqaalaha asluubta ee deegaanka si ay u bilaabaan, u dhamaystiraan una soo gudbiyaan codsiga OHP oo cusub muddo ah 72 saacadood gudahood kadib markii la xiro oo lana geliyo diiwaanka xabsiga. Dadkani waxay halis ugu jiraan natiijooyin caafimaad oo liita waxayna ka faa'iidayaan doonaan horumarinada caafimaad ee lagu sharaxay baragaraafka b ee sare. Dadkani waxay sidoo kale u qalmi doonaan adeegyada SDOH ee la xiriira xilliyada isbeddelada.

¹⁴ Binswanger, Ingrid A., Marc F. Stern, Richard A. Deyo, Patrick J. Heagerty, Allen Cheadle, Joann G. Elmore, iyo Thomas D. Koepsell. "Release From Prison — A High Risk of Death for Former Inmates," New England Journal of Medicine, Janaayo 2007

¹⁵ Gates, A., Artiga, S., Rudowitz, R., "Health Coverage and Care for the Adult Criminal Justice Involved Population," Kaiser Family Foundation, Sitembar 5, 2014. <https://www.kff.org/uninsured/issue-brief/health-coverage-and-care-for-the-adult-criminal-justiceinvolved-population/>.

Istaraatijiyada 2-aad. Joogtee heerarka u-qalmida ee ilmaha iyo xirmada faa'iidooyinka loogu talagalay Dhallinta Qabta Baahiyaha Daryeelka Caafimaadka ee Khaaska ah (YSHCN) ilaa ay ka gaarayaan da'da 26.

Markay timaado YSHCN, gobolka Oregon wuxuu soojeedinayaa in caymiska OHP loo fidiyo dhalinta ah 26 sano jir iyo in la joogteeyo heerarka u-qalmida oo ah 305% FPL si loo taageero in si fudud looga gudbo caafimaadka carruurta loona gudbo daryeelka caafimaadka dadka waaweyn. Qaar badan oo ka mid ah carruurtaan iyo dhallinyaradaan waxay ka soo jeedaan bulshooyinka midabka leh, LGBTQA+, xubno ka tirsan Qabiilada Oregon waxayna wajaheen hoy la'aan, Naafanimo Garasho ama mid Kobac (IDD)¹⁶ ama saboolnimo. Wax ka qabashada xilliyadan isbeddelka/kala-wareegan ayaa muhiim u ah yoolalka xaqsoorka caafimaadka ee Oregon sababtoo ah dad yar oo ka mid ah YSHCN ayaa helaya isku diyaarin isbeddel oo ku filan, caddaymaha qaarna waxay muujinayaan in xaaladdani ay daran tahay marka la eego jinsiyadaha iyo qowmiyadaha laga tirada badan yahay.¹⁷ Marka loo eego Sahanka Qaran ee Caafimaadka Carruurta ee 2018-19, 45% dhalinyarada Oregon ee da'doodu u dhaxayso 12-17 ayaa lahaayeen baahi daryeel caafimaad oo khaas ah. Xubnaha qoyska ee dhalinyarada qaba baahiyada daryeel caafimaad oo khaas ah ayaa soo sheegay in:

- 69% aysan helin adeegyada isku diyaarinta isbeddelka daryeelka caafimaadka,
- 38% aysan wakhti la qaadan daryeel bixiyayooda iyagoo keligood ah xilligii baaritaankoodii u dambeeyay,
- 21% aysan xirfado ay ku maareeyaan daryeelkooda ka baranin daryeel bixiyayaashooda daryeelka caafimaad, iyo
- 44% aysan caawimaad ka helin daryeel bixiyehooda daryeelka caafimaad si ay u fahmaan isbeddelada daryeel ee dhaca da'da 18 sano jir.¹⁸

U gudubka qaangaanimada waxay u baahan tahay in dhallinta ay codsadaan Medicaid iyagoo gooni ka ah waalidkooda ama mas'uuladooda si ay uga fogaadaan luminta caymiska. Caymiska laftiisu ayaa sidoo kale isbeddelayo oo ka wareegayo xirmada macaashyo ee loogu talagalay carruurta iyo dhallinyarada una wareegayo macaashyo loogu talagalay dadka waaweyn. In meesha laga saaro u gudubka xirmada faa'iido ee cusub ee loogu talagalay dadka qaangaarka ah, iyadoo ay YSHCN-da lagu darayo dadka u-qalma adeegyada SDOH ee xilliyada isbeddelada/kala-wareega, ayaa waxay dhalinyarada siin doontaa waqti ay si fiican ugu gudbaan isbeddelladan iyadoo ay yar yihiin carqaladaha suurtoogalka ah, taasoo kordhinayso suurtagalnimada inay u gudbaan qaan-gaarnimada iyagoo haysto daryeelka iyo marin u-helida lagama maarmaanka ah caafimaadka wanaagsan iyo tayada nololaha. Da'yarta qaangaarka ah ee qaba baahiyada daryeelka caafimaad ee khaaska ah, in si wax ku ool ah looga gudbo daryeelka carruurta loona gudba daryeelka caafimaadka dadka waaweyn ayaa waxay kordhineysaa¹⁹:

- U hoggaansanaanta daryeelka
- Xaadirista ballamada rugta caafimaad ee dadka waaweyn

¹⁶ <https://link.springer.com/article/10.1007/s11920-019-1016-1>

¹⁷ https://pediatrics.aappublications.org/content/126/Supplement_3/S129.short

¹⁸ Xaanshida Xaqiiqda ee Xarunta Oregon ee Carruurta iyo Dhallinyarada Qaba Baahiyada Caafimaad ee Khaaska ah, Dib loo eegay 4/26/2021 <https://www.ohsu.edu/sites/default/files/2021-04/Transition%20FACT%20SHEET%20rev.4.26.2021.pdf>

¹⁹ Xaanshida Xaqiiqda ee Xarunta Oregon ee Carruurta iyo Dhallinyarada qaba Baahiyada Caafimaad ee Khaaska ah, Dib loo eegay 4/26/2021, Op. cit.

- Qanaacada bukaanka
- Tayada nolosha
- Xirfadaha is-daryeelka

waxayna yareyneysaa:

- Hawlgabka daryeelka
- Waxyaabaha la aaminsan yahay in caqabado ku yihiin daryeelka
- Heerka isbitaal dhigista
- Muddada joogista isbitaalka
- Cudurrada iyo dhimashada

Istaraatiijiyada 3-aad. Bixi adeegyo SDOH ah oo qeexan oo ku salaysan shuruudaha la xiriira xilliyada isbeddelada si loo taageero dadka nugul ee adeegyada u baahan xilliga isbeddelada/kala-guurka

Gobolka Oregon wuxuu aqoonsaday oo uu soojeedinayaa in wax laga qabto dhacdooyinka kala-guurka ah ee xubnuhu la kulmi karaan inta ay nool yihiin taasoo sababay inaysan joogto ahayn helida daryeelka caafimaadka, adeegyada taageerada, ama daaweynta. Iyadoo ku xiran nooca xilliyada isbeddelada iyo carqaladaynta uu wajahayo xubinka, waxyaabaha ku jira xirmada waxa ka mid noqon kara isku-duwidda daryeelka oo la xoojiyey, kaalmada hagidda guriyeynta, taageerada shaqada iyo ku xiriirinta adeegyada kale ee bulshada iyadoo loo marayo iskaashatooyinka bulshada iyo ururada bulsheed. Intaas waxaa dheer, gobolka Oregon wuxuu aqoonsaday waxqabadyo gaar u ah xilliyada isbeddelada/kala-guurka si taageero dheeraad ah loo siiyo dadkan, sida hoos lagu sharraxayba. Xilliyada isbeddelada gaarka ah ee nidaamyada kala duwan, goobaha daryeelka caafimaadka ee kala duwan, iyo marxaladaha nolosha ama dhacdooyinka marmar dhaca ayaa waxay dhalin doonaan u-qalmida hal ama in ka badan xirmooyinka macaashyada. Marka xubin loo tixgeliyo in uu yahay mid uqalmo iyadoo lagu salaynayo xilliyada isbeddelada gaarka ah, qiimeynta baarista baahiyada bulsheed ayaa la isticmaali doonaa si loo ogaado macaashyada ku haboon.

Gobolka Oregon wuxuu codsanayaa awoodda kharashaadka ee lagu yareynayo kharashka federaal ee ku baxa Medicaid si CCO-yada loo siiyo lacag ka baxsan miisaaniyadda guud si wax looga qabto SDOH-yada xubnaha OHP ee wajahayo xilliyada isbeddelada nololeed ama carqaladaha cayiman (macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan codsigan ayaa waxaa laga heli karaa warqada fikrada *Maalgelinta Xaqsoorka Diirada La Saaray*). Gobolka Oregon wuxuu u arkaa lacagahan inay kordhin karaan kharashka HRS ee miisaaniyadaha guud sanadaha soo socda, maxaa yeelay waxay awood u siin doonaan CCO-yada inay yeeshaan awood oo ay aqoonsadaan adeegyada ugu waxtarka badan kahor intaysan si buuxda halis ugu gelin. Gobolka Oregon wuxuu soojeedinaysaa in maalgelinta ka baxsan miisaaniyadda guud hoos loo dhigo laga bilaabo sannadka saddexaad ee xilliga tijaabada. Intaas waxaa dheer, gobolka Oregon wuxuu codsanayaa maalgalin federaal oo hordhac ah si loo daboolo adeegyadan xilliyada isbeddelada ee SDOH.

Dadka uqalmo adeegyada xilliyada isbeddelada ee SDOH ee cayiman waxaa ka mid ah:

- a. Xubnaha hoylaawayaasha ah, ama halis ugu jira inay noqdaan hoy la'aan
- b. Xubnaha ka wareegaya caymiska Medicaid kaliya una wareegayo caymiska Medicare-Medicaid
- c. Xubnaha u nugul dhacdooyinka cimilada ee ba'an
- d. Xubnaha (dadka waaweyn iyo dhalinyarada) ka soo baxaya xabsiyada dembiyada
- e. Dadka waaweyn ee ka soo baxaya machadyada cudurrada maskaxda (IMD)
- f. Dhalinyarada qaba Baahiyada Daryeel Caafimaad oo Khaas ah ee ah ilaa 26 sano jir
- g. Dhalinyarada ku lug leh daryeelka carruurta oo ka soo baxaya ama galayo goobaha daryeelka korinta, oo ay ku jiraan kuwa ka weynaanayo korinta

Adeegyada kala-guurka/xilliyada isbeddelada ee SDOH ee la soojeediyay

Guriyeynta

Guriyeynta waa arrin bulsheed oo muhiim ah oo gacan ka geysato go'aaminta caafimaadka bulshada, waxayna in qofku leeyahay hoy la xiriirtaa isbitaal dhigista bukaan-jiifka oo heer hoose ah, booqashooyinka ED oo yar, iyo heerarka xabsi-gelinta oo hooseeya.^{20,21} Daraasad lagu sameeyay Oregon, kharashyada Medicaid ayaa hoos u dhacay 12% celcelis ahaan kadib markii dadku u guureen guryo la awoodi karo.²² Cunsurinimada hay'adaha kajirta ayaa waxay saamaysay helista guriyeynta. Marka loo eego xog 2018-kii ah, dadka ku nool Oregon ee ah Madowga, Dhaladka Mareykanka ama Reer Jasiirada Baasifik, ama laba jinsiyadood ama in ka badan ayaa ah qayb weyn oo ka mid ah dadka aan degganayn guryo marka loo eego saamiga ay ka yihiin wadarta dadweynaha.²³ Haddii aysan jirin wax-kaqabashooyin lagu taageerayo guriyeyn xasilloon, hoy la'aantu waxay kicin kartaa dhacdooyin leh isbeddelo xasillooni-daro wata, ugu dambeyntiina, waxay sare u qaadi kartaa kharashyada nidaamka daryeelka caafimaadka waxaana daciifi doona natiijooyinka caafimaad ee shakhsiyaadka. Taageerooyinka waxaa ka mid noqon kara mid ama in ka badan oo ka mid ah waxyaabaha soo socda:

1. Kaalmada kirada ama guriyeynta ku meel-gaarka ah (bixinta lacagta kirada, lacagaha hormariska ah/dhigaalada, kirada hore, guryaha safarayda ee loogu talagalay ee ku yaala geeska wadada, iwm. muddo ah ilaa 12 bilood)
2. Adeegyada guriga iyo bulshada ku salaysan (jaranjarooyinka, gacan-cuskadayaasha, kaalmada tamarta iyo biyaha, wanaajinta bay'ada, iwm.)
3. Adeegyada taageerada ee kireysiga kahor ah iyo kuwa kireysiga (adeegyada shaqada, kahortagga guri ka-saarista, codsiga guriyeynta, taageerada guuritaanka, iwm.)
4. Hagida diirada saarayso guriyeynta iyo/ama maareeyaha kiiska/dhacda (kootada 1:30; saan lagu sameeyo isdhexgalka shaqaalaha caafimaadka dhaqameed)

Gaadiidka la xiriira caafimaadka

1. Ku xiriirinta khayraadyada gaadiid ee jira
2. Bixinta lacagta gaadiidka si loo taageero adeegyada SDOH in la helo, (tus., kaadhahka baska, foorarrada tagaasida, dhibcaha gaadiid-wadaagga).
3. Adeegyada gaadiidka ee la xiriira caafimaadka ee aan ahayn Gaadiidka Caafimaadka ee Xaaladaha Aan Gurmada ahayn (NEMT)

Kaalmada cuntada

1. Ku xiriirinta khayraadyada cuntada ee bulshada ku salaysan (tus., taageerada codsiga ee Barnaamijka Kaalmada Nafaqada Dheeriga ah (SNAP)/Barnaamijka Nafaqada Dheeriga ah ee Gaarka ah ee Haweenka, Dhallaanka iyo Carruurta (WIC))

²⁰ Nakamura MM, Toomey SL, Zaslavsky AM, et al. Cabbiraadda heerarkadib ugu celinta isbitaalka ee carruurta ee ku aadan kor u qaadista tayada. Acad Pediatr. 2014

²¹ Guddiga La-talinta Medicaid ee Oregon. Maayo 2018. Wax ka qabashada Waxyaabaha Ku saabsan Bulshada ee Gacanta Ka Geysro Go'aaminta Caafimaadka Bulshada Inta Lagu Gudajira Wajiga Labaad ee Wax-ka-beddelka Nidaamka Caafimaadka: Tallooyin loogu talagalay Moodheelka CCO-yada Oregon

²²https://oregon.providence.org/~media/Files/Providence%20OR%20PDF/core_health_in_housing_full_report_feb_2016.pdf

²³ <http://oregonhousingconference.org/wp-content/uploads/2018/10/Oregon-Housing-Conference-10-15.pdf>

2. Waxbarashada nafaqada iyo cunno karinta
3. Rijeetooyinka miraha/furuutka iyo khudaarta iyo kaartoonada cuntada caafimaadka leh
4. Bixinta cunto loogu talagalay caafimaadka

Taageerada shaqada

Adeegyada taageerada shaqada ayaa la go'aamiyay inay lagama maarmaan yihiin si qofka uu u helo una haysto shaqada uu ka hayo bulshada dhexdeeda. Adeegyada taageerada shaqada waxay noqon doonaan kuwo shakhsiga gaar u ah waxaana ku jiri kara mid ama in ka badan oo ka mid ah waxyaabaha soo socda:

1. Taageerada qorsheynta shaqada ee shakhsiga ku salaysan
2. Horumarinta iyo meelaynta shaqa ee shakhsiga ku salaysan (tus., bandhigyo shaqo, waraysiyo)
3. La-talinta (tus., sida loo beddelo dhaqanka, ka soo noqoshada xabsiga)
4. Gaadiidka (loo bixiyo sidii adeeg gaadiid oo gaar ah oo loogu talagalay adeegyada shaqada ama lagu bixiyo shaqada xubinka)

U-baylah noqoshada dhacdooyinka cimilada

Dhowrkii sano ee la soo dhaafay gobolka Oregon wuxuu u adkaystay dhawr dhacdo oo aad u ba'an oo la xiriira isbeddelada cimilada, oo ay ku jiraan dab-duureedyada, duufaannada barafka, iyo kulayl aad u daran. Intii lagu guda jiray dhacdadii kulaylka ba'anaa ee ugu dambaysay ee Oregon dabayaaqadii Juun 2021, 116 qof oo Oregon ku nool ayaa u dhintay xanuun kulayl la xiriira ama kuleyl aad u sareeya. Dadka nugul/halista ku jira, oo ay ku jiraan carruurta, haweenka uurka leh, dadka waayeelka ah, bulshooyinka midabka leh, kooxaha soogalootiga ah (ay ku jiraan kuwa aqoontooda Ingiriiska ay xaddidan tahay), Hindida Maraykanka iyo Dhaladka Alaska, dadka naafada ah, kooxaha shaqo ahaan halista ku jira, sida shaqaalaha wajahayo cimilo aad u ba'an, bulshooyinka dakhligoodu yar yahay, dadka qaba xaalado caafimaad oo sii-jireen ah ama raagta, iyo isdhexgalyada kooxahan, ayaa la kulma saameyno caafimaad darro oo aad u badan sababtoo ah u adkeysigooda cimilada ayaa yar.²⁴ Dhacdooyinka cimilada ee aadka u ba'an ayaa soo noqnoqonaya iyagoo aad u xoogan, waxayna carqaladayn karaan helida daryeelka caafimaadka iyo xitaa caymiska.²⁵ Faa'iidooyin la siiyo dadka ay saameeyeen masiibooyinka cimiladu iyo kuwa u nugul cimiladu aadka u ba'an ayaa yarayn kartaa xaqsoor la'aanta caafimaadka iyo carqaladaynta adeegyada daryeelka caafimaadka iyo caymiska.. Taageerooyinka waxaa ka mid noqon kara mid ama in ka badan oo ka mid ah waxyaabaha soo socda:

1. Lacag bixinta gaadiidka dadka geenayo goobaha qaboojinta/kululaynta iyo/ama goobaha u daad-gureynta (tus., foorjarrada tagaasida, dhibcaha gaadiid-wadaaga, isticmaalka NEMT ama gaadiidka caafimaadka la xiriira ee sare)
2. Bixinta lacagta aaladaha joogteeyo heerkul caafimaad leh iyo hawo nadiif ah, oo ay ku jiraan qalabyada xakameeyo hawada, kuleyliyaasha, filtarrada/miirayaasha hawada iyo matoorada ay ugu shaqeeyaan aaladaha marka korontadu maqan tahay
3. Lacagta ama foorjarrada wax looga qabanayo biilasha korontada ee badan ee ka dhasho heerkulka aad u sareeya
4. Taageerada iyo adeegyada guriyeynta, dayactirka guryaha ee uu qasba dab-duureedka si guryaha looga dhigo kuwa lagu noolaan karo

²⁴ <https://www.apha.org/topics-and-issues/climate-change/vulnerable-populations>

²⁵ https://earthobservatory.nasa.gov/features/RisingCost/rising_cost5.php

5. Helida degdegga ah ee qalabka caafimaad ee waara (DME) ee laga tagay iyadoo aan la haysan riijeeto ama oggolaansho hordhac ah
6. Dharka iyo/ama cuntada loogu talagalay xubnaha ay saameeyeen dhacdooyinka cimilada aadka u ba'an (tus., dab-duureedka)

Istaraatiijiyada 4-aad. Ballaari kaabayaasha loo baahan yahay si loo taageero helida adeegyada iyadoo la isticmaalayo bixiyeyaasha ka baxsan moodheelka caafimaadka

Gobolka Oregon wuxuu soo jeedinayaa hagida helitaanka adeegyada ee xubnaha ee kor u qaadaya xaqsoorka caafimaadka, oo ay ku jiraan daryeelka ka jawaabaya dhaqanka bulshada iyadoo la adeegsanayo Shaqaalaha Caafimaadka Dhaqameed (THW) - oo ay ku jiraan shaqaalaha caafimaadka bulshada, hagamaasha caafimaad ee gaarka ah, takhasuslayaasha faydaqabka koox-faceedka iyo taageerada iyo umulisooyinka. THW-yada iyo koox-faceedyada inta badan waa shakhsiyaad la aamini karo oo ka socda bulshooyinka xubnaha kuwaasoo sidoo kale laga yaabo in ay yaqaanaan xiriirada dhaqanka iyo dhaqaalaha bulshada iyo inay khibrad u leeyihiin nolasha bulshada, taasoo ka dhigaysa inay si fiican ugu haboon yihiin inay ka caawiyaan xubnaha inay si guul leh uga gudbaan xilliyada isbeddelka.

Sida ku cad maamulka Qorshaha Gobolka ee Medicaid ee haddeer jira, adeegyada ay bixiyaan koox-faceedyada (PDS) ayaa la bixiyaa iyagoo qayb ka ah qorshe daawayn ee uu sameeyo uuna fuliyo daawayn bixiye shatiyeysan. Marka la helo ka-tanaasulaadan, gobolka Oregon wuxuu ballaarin doonaa helitaanka PDS. Koox-faceedyada soo kabashada ayaa la oggolaan doonaa in lacagtooda lagu bixiyo dibadda qorshaha daawaynta dhaqameed (sida, kahor iyo kadib daawaynta) ama, taa beddelkeeda, in la isticmaalo adeegyada SDOH ee la soojeediyay ee wax ka qabanayo baahiyada bulsheed ee shakhsiyaadka ka baxsan adeegyada caafimaadka caadiga ah iyo qaabka lacag-bixin ee la xiriira. Oggolaanshaha helitaanka adeegyada ay bixiyaan koox-faceedyada iyadoo aan loo marayn qorshe daawayn ayaa waxay meesha ka saaraysaa caqabadaha daawaynta waxayna xaqiijin doontaa in shakhsiyaadku helaan taageerooyinka soo kabashada muddada soo kabsashadooda, oo ay ku jiraan kahor iyo kadib daawaynta iyo inta lagu gudajira xilliyada isbeddelka daryeelka. Xubnuhu ayaa sii wadi doona inay helaan PDS inta lagu jiro daawaynta iyadoo loo marayo Qorshaha Medicaid ee Gobolka. In kastoo hormarintani ay faa'iido u yeelan doonta dhammaan xubnaha, waxay muhiim u yihiin taageerada xubnaha ku jira xilliga isbeddelka/kala-guurka ee caymiskooda. Fikradani waxay taageero badan ka heshay dadweynaha, ururada bulsheed, iyo bulshada soo kabashada.

Istaraatiijiyada 5-aad. Hel awood kharash-gareyn si loo taageero awoodda hirgelineed ee heerka bulsho, oo ay ku jiraan bixinta lacagta kaabayaasha iyo kobcinta awoodda ee loogu talagalay bixiyeyaasha iyo ururada bulsheed (CBO).

Gobolka Oregon wuxuu raadsan doonaa inuu helo awood kharash-gareyn si loo taageero awoodda hirgelineed ee heerka bulsho, oo ay ku jiraan bixinta lacagaha bixiyaha kaabayaasha Ururada Bulsheed (CBO) iyo kobcinta awoodda. Iskaashatooyinka Maalgelinta Bulshada (CIC-yada), sida lagu sharaxay *maalgashiga xaqsoorka diiradda la saaray* ee warqadda fikradda, ayaa waxay kaalin muhiim ah ka ciyaari doonaan dhisida awoodda si loo sameeyo kaabayaasha/nidaamyada lagama maarmaanka u ah in bixiyeyaasha loo diyaariyo inay bixiyaan adeegyada idman, helaan lacagta, ayna ka soo warbixiyaan macluumaadka loogu talagalay maaraynta daryeelka bukaanka, la socoshada natiijooyinka, iyo xaqiijinta daacadnimada barnaamijka ama kaalmada farsamo iyo la shaqaynta daneeyayaasha.

Waxa siyaasadahani uga dhigan yihiin xubnaha OHP

Xubnaha OHP waxay uqalmi doonaan macaashyo gaar ah oo ku salaysan isbeddelada nololeed ee gaarka u ah shakhsiga kuma saleysno xanuunka laga qofka. Tusaale ahaan, xubnaha OHP ee gacanta lagu haya, sida kuwa ku jira Isbitaalka Gobolka Oregon, xarumaha kale ee deggaanka ah ee caafimaadka maskaxda ama

xabsiyada- waxay heli doonaan macaashyo xaddidan iyo diiwaangelinta CCO oo u oggolaanaysa inay ku xirmaan adeegyada sida daawaynta isticmaalka mukhaadaraadka, taageerada guriyeynta, iyo gaadiidka, marka ay ka soo baxaan gacan-ku-haynta/xabsiga.

Dhallinyarada qaba Baahiyada Daryeelka Caafimaad ee Qaaska ah (YSHCN) waxay sii haysan doonaan faa'iidooyinkooda OHP ilaa ay gaaraan da'da 26. Tani waxay xaqiijineysaa helida daawayn iyo bixiyayaasha la yaqaan xitaa haddii dakhliga qoyskoodu uusan u qalmin OHP.

Dhammaan xubnaha OHP ee ku jira xilliyada isbeddelada kor lagu soo sharaxay iyo sidoo kale xubnaha hoylaawayaasha ah, ama halis ugu jira inay noqdaan hoy la'aan; Xubnaha ka soo wareegaya caymiska Medicaid kaliya una wareegaya caymiska Medicare-Medicaid, xubnaha u nugul dhacdooyinka cimilada ee aadka u ba'an; iyo dhalinyarada ku lug leh daryeelka carruurta ee galayo kana baxaya guryaha daryeelka korinta waxay heli doonaan taageerooyin iyo iskudubarid la xoojiyay inta lagu gudajiro xilliyada isbeddelka/kala-guurka. Taageerooyinkan waxaa ka mid ah waxyaabaha si weyn u taageera natiijooyinka caafimaadka qofka balse aan caadi ahaan loo tixgelin inay yihiin daryeel caafimaad (tusaale ahaan, saarista caqabadaha ku gaadaaman helitaanka ama dayactirka guryaha).

Xubnaha waxay in badan heli doonaan adeegyada kor u qaadaya xaqsoorka caafimaadka, oo ay ku jiraan daryeelka ka jawaabaya dhaqanka bulshada iyadoo la adeegsanayo Shaqaalaha Caafimaadka Dhaqameed (THW) - oo ay ku jiraan shaqaalaha caafimaadka bulshada, hagamaasha caafimaad ee gaarka ah, takhasuslayaasha faydaqabka koox-faceedka iyo taageerada iyo umulisoooyinka. THW-yada iyo koox-faceedyada inta badan waa shakhsiyaad la aamini karo oo ka socda bulshooyinka xubnaha kuwaasoo sidoo kale laga yaabo inay yaqaanaan xiriirada dhaqanka iyo dhaqaalaha bulshada iyo inay khibrad u leeyihiin noloshu bulshada, taasoo ka dhigaysa inay si fiican ugu haboon yihiin inay ka caawiyaan xubnaha inay si guul leh uga gudbaan xilliyada isbeddelka.

Lifaaqa A

Istaraatiijiyado dheeraad ah (aan tanaasulka ka mid ahayn)

Hoos waxaa ku yaalo istaraatiijiyado dheeraad ah uu gobolka Oregon ku dabajiro si uu u taageero shaqadan laakiin aan u baahneyn awood ka-tanaasulid:

1. Kalfadhiga 2021, Golaha Sharci-dejinta ee Oregon wuxuu in ka badan \$500 milyan oo ah maaliyadda gobolka ku maalgeliyay sidii loo wanaajin lahaa nidaamka caafimaadka habdhaqan ee bulshada Oregon si loo soo gaabiyo muddada joogitaanka Isbitaalka Gobolka Oregon iyo xarumaha kale ee IMD.
2. Kalfadhigii sharci-dejinta ee 2021, gobolka Oregon wuxuu ku aasaasay oo uu maalgeliyay khadka tooska ah ee 9-8-8 ee loogu talagalay kahortagga is-dilka iyo dhibaataada caafimaadka habdhaqan si loogu taageero shakhsiyaadka wajahayo dhibaatooyinka caafimaadka maskaxda ee ba'an (Oregon House Bill 2417(2021)).²⁶
3. Gobolka Oregon wuxuu daneynayaa inuu adeegsado istaraatiijiyado lagu beddelayo xeerarka iyo qandaraasyada si wanagsan loo taageero dadka ka gudbaya aagagga adeega CCO (ka guurayo hal CCO

²⁶ <https://olis.oregonlegislature.gov/liz/2021R1/Measures/Overview/HB2417>

una guuraya mid kale). Tusaale ahaan, carruurta ku jirta daryeelka carruurta ayaa laga yaabaa inay joogaan qoys korin oo ku nool aagg ah adeega CCO oo ka duwan aagga CCO-da gurigooda.

4. Kuwa aan hadda haysan caymiska OHP oo ansax ah, OHA waxay kaashan doontaa Barnaamijka Wacyigelinta Iskaashatada Bulshada iyo shaqaalaha asluubta ee deegaanka si ay u bilaabaan, u dhamaystiraan una soo gudbiyaan codsi cusub oo OHP ah 72 saacadood gudahood marka la xiro lagana diiwaangeliyo jeelasha degmada iyo xarumaha asluubta ee deegaanka (taariikhda uu caymiska dhaqangeliyo waxay noqon doontaa taariikhda diiwaangelinta waxaana caymiskadib loogu soo celin doonaa taariikhdaas); waxayna diiwaangelinta CCO ee aagga degaanka qofka (ama CCO-da la xushay haddii ay jiraan CCO-yo badan oo u adeegaya aagga) dhici doontaa isla markiiba marka la go'aamiyo u-qalmida OHP.

Waxaad ku heli kartaa dukumintigaan luuqado kale, daabacaad weyn, qoraalka indhoolayaasha ama qaabka aad jeceshahay. Kala xiriir

Barnaamijka Wacyigelinta Iskaashatada Bulshada (Community Partner Outreach Program)

community.outreach@dhsosha.state.or.us ama adigoo wacaya 1-833-647-3678. Waxaan aqbalnaa dhammaan wicitaanada dadka hadalka dhibayo ama waxaad wici kartaa 711.